

**Notes on the House of Representatives' plans to start consulting on the revisions of the 2005 HoR Election Law, and particularly on the controversial issue of regional allocation of seats.**

***For an English language report on this issue, see:***

**<http://www.somalilandpress.com/somalilandnationwide-public-hearing-consultations-on-proposed-sl-house-of-representatives-election-law-launched/>**

**SHIRGUDOONKA & Guddida Arrimaha Gudaha Iyo Nabadgalyada Oo Maanta Kulan La Yeelatay  
Masuuliyiin Ka kala Socday Haa'yadaha SAFERWORLD. SONSAF, ADP, NEC**

**<http://www.somalilandparliament.com/2016/02/19/shirgudoonka-guddida-arrimaha-gudaha-ijo-nabadgalyada-oo-maanta-kulan-la-yeelatay-masuuliyiin-ka-kala-socday-haa'yadaha-saferworld-sonsaaf-adp-nec/>**

Hargeysa (SL-P) 18/02/2016

Waxa maanta Guddida Arrimaha Gudaha Iyo Nabadgalyada ee Golaha Wakiiladu kulan la yeelatay Xafiiskeeda Haa'yadaha SAFERWORLD. SONSAF, ADP, NEC. kulan kan oo u jeedadiisu ahay in laysla eego sidii loo bilaabi lahaa hawsha Xeerka doorashada golaha wakiilada oo ay Guddidu Gacanta Ku hayso, kasoo dhawaan guddudi safari ugu bixi doonto gobolada oodhan.

kulankan oo uu Gudoominaayey Gudoomiye ku xigeenka koowaad ee golaha Baashe Maxamed Faarax waxa kale oo kulan ku wehelinayay Gudoomiye ku xigeenka Guddida mudane Bashiir Xuseen Tukaake, mudane: Cali Xaaji Maxamed, Mudane:C/laahi Xuseen Cige, Mudane: Xaashi Xuseen Caabi. Xoog-haya Golaha Wakiilada, Mudane C/risaaq Siiciid Ayaanle Iyo Xoog-haya Guddida C/raxmaan Jaamac Nuur.

Dhinaca Haayada waxa ka kala socday SAFERworld, C/jaliil Daahir, Marjome Walla, Olie Chevreew, Moses Owuor, SONSAF: Maxamed Axmed iyo Mustafe Sacad, ADP, Maxamed Faarax, NEC. Xasan Faarax,

Kulan oo loo balansanaa in guddida iyo hayadaasi ay isla eegaan sida loo bilaabayo hawsha iyo wakhtiga la bilaabayo, ayaa Gudoomiye ku xigeenka Golaha wakiiladu uu ka war bixiyay muhiimada uu leeyahay xeerkan iyo sida loogu baahan in sida u dhakhsaha badan loo galo gudiduna ay diyaar u yihin sidi ay hawsha u soo dhamaystiri lahaayeen kalfadhigan soo socdana loo so hor dhigi laha golaha, kaliya ay u baahan yihin in laga taageero kharashka hawsha ku baxa.

Geesta kale Masuulkii ka socday Haay'adaha waxay sheegen inay diyaar u yihin inay ka cawiyaan kharakhka ku baxaya hawsha oo ayna u hayaan diyaarna u yihin in sida u dhakhsaha badan loo bilaabi hawsha xeerka.

Gabagabadii kulankan waxa lasyku afgartay in hasha la bilaabo todobaadka soo socda, gudiduna ay diyaarisiso jadwalki ay hasha ku fulin lahay, sabtida soo socotana ay kulanka kale iskugu soo noqdaan Guddida iyo haayadahani oo ay jadwalka iyo bilowga hawshaba dhameeyan.

C.raxman Jamac Nuur (NABADOON NUURAANI)

Xoog-hayaha Gud.arri. Gudaha & Bahda Warbaahinta Golaha Wakiilada JSL

**On SONSAF's role in the consultation process, see:**

**Wejiga 1aad Ee Abuurista Xeerka Soo Xulaya Musharraxiinta Baarlamaanka Oo La Daah-furay iyo  
Doorka Jileyaasha aan Dawliga Ahayn**

February 26, 2016

Source: <http://waaheen.com/?p=51635>

***SONSAF Oo Xagga Dhaqaalaha Ka Saacidaysa Xog-ururin ay Golaha Wakiilladu Ka Samayn  
Doonaa Lixda Gobol***

Hargeysa (Waaheen)-Shirguddoonka golaha wakiillada Somaliland, ayaa si rasmi ah u daaf furay wajiga koowaad ee abuurista xeerka doorashooyinka xubnaha Baarlamaanka, kaas oo ah oo lagu bilaabi doono xog-waraysi ay guddida arrimaha gudaha, difaaca iyo nabadgelyada ee golaha wakiilladu kusoo amri doonaan lixda gobol ee doorashooyinku ku sar go'an yihiin.

Kulanka lagu shaacinayey bilwoga wajigan koowaad oo maanta sabti bilaabmi doona, ayaa lagu shaaciyeey xarunta guud ee golaha wakiillada, waxana goob joog ka ahaa Saddexda Xisbi-qaran ee dalka iyo Dallada ay ku bahoobeen ururrada aan dawliga ahayn ee SONSAF oo iyadu xagga dhaqaalaha arrinta ka caawinaysa.

Xog-ururinta ay guddi hoosaadka arrimaha gudaha iyo difaaca ee golaha wakiilladu abuurista xeerkii ku bilaabi doonaan, ayaa socdalkooda gobollada dalka fadhiyo kala duwan la yeelan doona waxgaradka, haweenka, aqoonyahanka, dhallinyarada iyo ururrada bulshada rayidka ee deegaanadaas, waxana xogta ay soo helaan ay kula soo laaban doonaan goleweynaha wakiillada, iyadoo intaas dibna go'aanka ugu dambeeya ay saddexda xisbi fadhi kale yeelaan doonaan, islamarkaana soo saari doonaan sida loo qaybsan doono saamiga mudanayaasha oo muran badani ka taagan yahay.

Guddoomiye-ku-xigeenka koowaad ee golaha wakiillada Md Baashe Maxamed Faarax oo ugu horrayn halkas ka hadlay, ayaa isagu faahfaahihey shaqada guddidan loo igmaday iyo sida ay wax usoo baadhi doonaan,

“Dhibka ugu weyn ee doorashada inaga haystaa waa muranka ka taagan saami-qaybsiga, xeerkii horena ku meel gaadh buu ahaa, gobollo badan baana muran ka taagan yahay, waxana aanu ku baaqnay in talo qaran laga yeesho oo gobollada dalka oo dhan lasoo maro wixii ay keenaana talo dambe oo guud la iskugu yimaaddo, iyadoo xisbiyada qarankuna go'aanka ugu weyn ee dhinaca saamiga yeelan doonaan.” Ayuu yidhi Baashe Maxamed Faarax.

Guddoomiyaha Dallada ay ku bahoobeen ururrada aan dawliga ahayn ee SONSAF Md Mustafe Sacad Dhimbiil oo dalladiisu xog ururintan dhinaca dhaqaalaha ka saacidayso, ayaa isagana waxa hadalladiisii kamid ahaa,

“xeerka baarlamaanka, ayaanu kala shaqaynaynaa guddi hoosaadka golaha wakiillada, maantana waxa aynu u baahanay xeer dhamaystiran oo muddo dheer aynu isticmaalno, inagoo kasoo bilaabi doono min degmo ilaa gobol iyo shacbiga golahani metelaan oo ra’iyadooda la dhegaysan doono, waxa waajib inagu ah in muddada kooban aynu keeno wax ugu yaraan heshiis lagu yahay. Dhammaan xeerarka dalka ee u baahan fududay haddaanu nahay ururrada bulshada inaanu gacan ka geysanno annagoo la kaashanayna deeq bixiyayaasha diyaar baanu u nahay.”

Guddoomiye-ku-xigeenka koowaad ee xisbiga muxaafidka ah ee Kulmiye, Mujaahid Maxamed Kaahin Axmed, ayaas isaguna soo jeediyeey in loo baahan yahay in si wada jir ah loo wajaho cabashada ka taagan saamiga lagu soo dooranayo Mudanayaasha, waxana uu hoosta ka xarriiqay in si guud loo eego cabashada taagan,

“Hay’adda SONSAF waanu u mahad naqaynaa, arrintan xilkeedana waxa iska leh golaha wakiillada, xukuumadda iyo xisbiyada qarankuna qayb bay ku leeyihiin, saami-qaybsigana dhammaan gobolladu way ka cabanayaan, haddana gobolladu indho gobol bay ku eegayaan, arrinkuna indho qaran in lagu eego ayuu u baahan yahay, mana jiro minqiyas saamiga dalka wax loogu qaybiyo, maadaama aanay dadkeen tiro koobnayn”ayuu yidhi Maxamed Kaahin.

Guddoomiye Maxamed oo hadalkiisa sii wata, ayaas waxa uu yidhi,

“Marka saamiga laga hadlayo, madaxda axsaabta iyo kuwa qaranku yaanay qabiilkooda iyo qoladooda la cadhoon oo ay talada qaranka qayb ka noqdaan oo iska dhex baadhaan xalka.”

Ku-simaha xog-hayaha guud ee xisbiga Ucid Cabdinaasir Qodax oo isaguna halkaas ka hadlay, ayaas qabyada ku jirta xeerkan ku canaantay golaha wakiillada,

“waa wakhti ku haboon in arrintan la gudo galo, waxana waajibaadka golaha haatan fadhiya kamid ahaa inay xeerkii lagu dooran lahaa diyaariyaan, hase yeeshee waanu ka xunnahay inay xilligan xaasaasiga ah kusoo beegaan.”ayuu yidhi Naasir Qodax.

Xoghayaha guud ee xisbiga Waddani Maxamed Cabdilaahi Uurcadde, ayaas isagu eedda xeerkaas ku jirta ku sheegay mid qaranka oo dhammi leeyahay, waxana uu yidhi,

“waanu ku hambalyeynaynaa tallaabada ay guddidani qaadeen, waxa la isku hayaana qodob hore si ku-meel gaadh ah la yidhi doorashada halloogu gallo, waxana aan qabaa inay ahayd arrin qaranka oo dhan u taallay oo ay ahayd inay xukuumaddu hoggaamiso.”